



Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance

November 24, 2018

--War Saxaafadeed--

Wasaaradda Maaliyaddu waxay soo dhoweynaysaa go'aankii Golaha Shacabku manta ku tirtiray warbixintii ay soo gudbiyeen qaar kamid ah Gudiga Maaliyadda Golaha Shacabka oo ku saabsanayd miisaaniyadda sanadka 2018 oo aan weli xirmin, warbixintaas oo baal marsaneyd habraaca iyo xeer hoosaad golaha oo dastuuri ah.

Wasaaradda Maaliyaddu waxay si buuxda u burisay warbixintii ay qaar gudiga kamid ahi soo saareen waxayna Golaha u caddeysay in aanay warbixintaa waxba ka jirin.

Wasaaradda Maaliyaddu waxay sii wadaysaa qaabaynta iyo dib u habaynta maaliyadda si waafaqsan shuruucda dalka iyo xeerarka maaliyadda ee caalamiga ah. Wasaraada waxaa ka go'an in ay sii waddo nidaamka hufnaanta maaliyadda, isla xisaabtanka iyo daah furnaanta. Wasaaraddu waxay xoojinaysaa wada shaqaynta ay la leedahay hay'adaha dastuuriga ahee dalka iyo kuwa caalamiga ah waxayna sii kordhinaysaa shaqada ay ummadda Soomaaliyeed u igmatay.

-----Dhamaad-----

